

## **Ogolaansho Aqoon Leh iyo Bixinta Macluumaadka oo loogu talagalay Baaritaanka Lagu Ogaanaayo COVID-19**

### **Ogolaanshaha Baaritaanka Lagu Ogaanaayo COVID-19**

Si ikhtiyaari ah ayaan u ogolahay iyo ugu fasaxayaa UC San Diego Health, Clarity Lab Solutions, LLC, iyo/ama Responsive Partners, LLC, oo la shaqeynaayo Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego, inay sameeyaan uruurinta, baaritaanka, falanqaynta oo ay ujeedadu tahay baaritaanada lagu ogaanaayo COVID-19 oo lagu sameynaayo ardayga (uu hoos ku qoran yahay magaciisa).

Waan qirayaa iyo waan fahansanahay in baaritaanka lagu ogaanaayo COVID-19 uu u baahnaan doono uruurinta muunad haboon iyadoo loo maraayo qori suuf leh oo la gelinaayo sanka intiisa hore, qori suuf leh oo la gelinaayo afka, ama nidaamy kale oo wax lagu uruuriyo oo lagu taliyey.

Aniga ayaa si dhammaystiran oo buuxdo u qaadaayo mas'uuliyada ah inaan qaato talaabooyinka haboon oo khuseeyo natiijooyinka baaritaanka. Hadii aan qabo su'aalo ama ay jiraan waxyaabo aan ka walwalsanahay oo ku saabsan natiijooyinka baaritaanka ama xaalada jirka ee ardayga, waa inaan si dhaksho ah talo iyo daaweyn ka raadsado meel laga bixiyo daaweyn oo haboon.

**Waan fahansanahay inaysan jirin lacag laga qaadaayo ama la siinaayo ardayga, waalidka ama caymiska caafimaadka oo loogu talagalay baaritaankaan wax lagu ogaanaayo.**

Waan fahansanahay in saxiixitaanka foomkaan uu u ogolaanaayo UC San Diego Health, Clarity Lab Solutions, LLC, iyo/ama Responsive Partners, LLC, inay marar badan baaraan ardayga uu magaciisa ku qoran yahay hoos (sida asbuuc kasta, labo mar asbuuci, 2'dii asbuuc'ba, 3'dii asbuuc'ba ama wax ka yar) iyadoo ay ku xiran sida loo heli karo baaritaanka iyo xaaladaha cudurka ee bulshadeena. Waan ogolahay in la baaro cunugayga anigoo aan joogin ilaa Junyo 30, 2022.

Waan fahansanahay inaan qoraal ahaan oga noqon karo Ogolaanshahaan waqti kasta oo ka horeeya baaritaanka la sameynaayo iyo in aan mar dambe la baari doonin ardaygayga. Hadii aan si qoraal ahaan u ogeysiiyo Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego si aan oga noqdo Ogolaanshahaan, UC San Diego Health, Clarity Lab Solutions, LLC, iyo/ama Responsive Partners, LLC mar dambe ma baari doonaan cunugayga.

Xaga ardayda UCSD ka helaayo baaritaan COVID-19.

- Waan fahansanahay in loo baahan yahay inuu cunugayga bukaan ahaan oga qornaado UC San Diego Health (hadii-uusan hore ugu qornayn) iyo in xaga ujeedooyinka raad-raaca uu ku qornaado MyUCSDChart.

- UC San Diego Health ayaa taleefoon u diri doonto waalidiinta hadii ay natiijo sheego inuu jiro cudur si ay wax ugu sharaxdo iyo ay u siiso tilmaam. Waxaa natiijooyinka aan sheegin inuu jiro cudur laga heli doonaa MyUCSDChart keliya.

**Bixitaanka Macluumaadka oo loogu talagalay Clarity Lab Solutions LLC, Responsive Partners LLC, iyo Primary Diagnostics, Inc.**

Waan fahansanahay in laga yaabo inuu ardaygayga ka helo Clarity Lab Solutions LLC, Responsive Partners, LLC, iyo/ama UC San Diego Health baaritaanka lagu ogaanaayo COVID-19, sida loo helo. Waxaan kaloo si dheeraad ah u fahansanahay in laga yaabo inuu ardaygayga qaato baaritaan lagu ogaanaayo COVID-19 uu bixiyo gobolka. Primary Diagnostics, Inc. waa nidaamka gobolka oo lagu uruuriyo natiijooyinka COVID-19 iyo macluumaadka la xiriiro oo ka imaado baaritaanada wax lagu ogaanaayo uu bixiyo gobolka.

Waan u ogolahay Clarity Lab Solutions, LLC, Responsive Partners, LLC, iyo/ama Primary Diagnostics, Inc. inay siiso macluumaadka gaarka u ah qofka oo loogu talagalay ardayga (oo ka mid ah magaca, jaadka, taariikhda dhalashada, iyo, ilaa xadka ay ku haboon tahay, macluumaadka qofka uu ku xiran yahay iyo/ama qofka mas'uulka ka ah), macluumaadka xiriirka (oo ka mid ah ilaa xadka ay ku haboon tahay, lambarkayga taleefoonka, cinwaankayga iimaylka, ama cinwaankayga aan deganahay ama cinwaankayga boostada), macluumaadka ballanta, lambarka aqoonsiga macaamilka, macluumaadka iyo natiijooyinka baaritaanka COVID-19, Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego, waaxda deegaanka iyo gobolka, ama hay'ad kasta kale oo dawladeed sida laga yaabo inuu sharciga faro.

Degmada Dugsiga ayaa igu soo ogeysiin doonto taleefoonka natiijo kasta ee baaritaan oo muujineyso in la helay cudurka. Waxaan natiijooyinka baaritaanada aan muujineynin in la helay cudurka ku ogaan karaa inaan waco kal-kaaliyaha caafimaadka ee goobta dugsiga ee ardaygayga.

**Bixitaanka Macluumaadka ee loogu talagalay UC San Diego Health**

Waan fahansanahay hadii uu ardaygayga ka helo UC San Diego Health baaritaan COVID-19, waxaa kaloo la iga codsan doonaa inaan buuxiyo Foomka Bixitaanka Macluumaadka (Release of Information Form) ee UC San Diego Health.

Waan fahansanahay inay foomamka Caafimaadka Ee UC San Diyeego (UC San Diego Health forms) i weydiinayaan lambarka amniga bulshada ee loo yaqaano Social Security Number, laakiin inaan la iga rabin inaan sheego lambarkaan iyo in lasoo bandhigi doono baaritaanka hadii la keeno lambarka loo yaqaano Social Security Number ama hadii aan la keenin'ba. **Hadii la sheego ama aan la sheegin lambarka amniga bulshada oo loo yaqaano Social Security Number ma saameyneeyso u qalmitaanka ardayga in lagu**

**qoro ama uu helo adeegyada wax barashada. Lambarada loo yaqaano Social Security Numbers, ama inaan lasoo sheegin mid ma aha wax ay Degmada Dugsiga la wadaagi doonto dad kale marka laga reebo UC San Diego Health, UC San Diego Health'na lama wadaagi doonto macluumaadkaan qof kale ama hay'ad kale.**

**Wax Barista, Tababarka iyo Wax Barashada Ee UC San Diego Health**

Waan fahansanahay iyadoo ah qayb ka mid ah ujeedadeedu wax barista, waxay UCSDH bartaa iyo ku tababartaa ardayda shaqooyinka xirfada ee daryeelka caafimaadka iyo in laga yaabo inuu qof tababaranaayo oo la koormeeraayo ka qaado cunugayga baaritaanka COVID-19.

**Xuquuqda Bukaanka Iyo Dhaqamada Waxyaabaha Gaarka U Ah Qofka**

a) Ogeysiiska Dhaqamada Waxyaabaha Gaarka U Ah Qofka Iyo Xuquuqda Bukaanka: "Ogeysiiska Dhaqamada Waxyaabaha Gaarka U Ah Qofka" (Notice Of Privacy Practices) ee UC San Diego Health ayaa sharaxo siday uu u isticmaali karo iyo u sheegi karo macluumaadkaaga caafimaadka ee la ilaaliyo, waxaana laga heli karaa websaytkaan: <https://health.ucsd.edu/hipaa/Pages/hipaa.aspx>

b) U Sheegitaanka Maamulka Dawlada (Disclosure to Government Authorities): Waan qirayaa iyo waan ogolahay in UC San Diego Health iyo/ama Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego laga yaabo inay u sheegaan natiijooyinkega baaritaanka iyo macluumaadka la xiriira wakaaladaha deegaanka iyo gobolka oo haboon, siduu sharciga faro.

Magaca Ardayga: \_\_\_\_\_  
Hore Dambe

Taariikhda Uu Dhashey Ardayga: \_\_\_\_\_  
Bisha / Maalinta / Sannadka

Dugsiga Uu Ku Qoran Yahay Ardayga: \_\_\_\_\_ Fasalka: \_\_\_\_\_  
Macalinka \_\_\_\_\_

Saxiixa Ardayga (da'da 12 iyo wixi ka weyn) \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_

Saxiixa Waalidka Ama Qofka Sharciyan Mas'uulka Ka Ah Ardayga \_\_\_\_\_  
Taariikhda: \_\_\_\_\_

Magaca Waalidka Ama Qofka Sharciyan Mas'uulka Ka Ah Ardayga Oo Qoran:

---

Taariikhda Uu Dhashey Waalidka Ama Qofka

Sharciyan Mas'uulka Ka Ah Ardayga:

\_\_\_\_\_

Bisha / Maalinta / Sannadka

Lambarka Taleefoonka Waalidka Ama Qofka Sharciyan Mas'uulka Ka Ah Ardayga:

---

Cinwaanka Iimaylka Waalidka Ama Qofka Sharciyan Mas'uulka Ka Ah Ardayga:

---